Marka aad tahay dhibbanaha dembiga, Minnesota waxa ay ku siinaysaa xuquuq muhiima inta uu kiiskaaga nidaamka sharciga la marinayo.

MARKA FAL-DAMBIYEEDKA LA SOO WARGALIYO WAKAALADDA AMMAANKA

Xaq ayaad u leedahay in aad:

- Wakaaladda ammaanka weydiisato in ay shaqsi ahaantaada laga saaro warbixinnada la siinayo dadweynaha.
- Lagula socodiyo xuquuqda dhibbanaha dembiga qaarkood meesha kuugu dhow ee laga bixiyo barnaamijka iyo ilaha gargaarka.
- Dalbato magdhow (magdhow dhaqaale) khasaaraha kaaga soo gaaray waxa aan hantida ahayn ee dembiga culus.
- Marka ay jiraan xaaladaha dembi culus ama xadgudubka guriga ee shaqsi loo xiray, in lagula socodsiiyo siidaynta eedeysanaha ayadoo ay la socdaan macluumaadka siidaynta shurudaha leh iyo wakaaladda kormeeraysa.

MARKA KIISKA DACWADDA LA QAADAYO

Xaq ayaad u leedahay in lagula socodsiyo waxa la xariira:

- Qaabka dacwadda loo qaadayo iyo xaqaaqa ah in aad ka qaybqaadatid.
- Macluumaadka laga helayo rugta kuugu dhow ee barnaamijka ama ilaha gargaarka dhibbanaha.
- Xaqa aad u leedahay in aad ku dalbatid magdhaw (magdhaw dhaqaale) khasaaraha kaaga soo gaaray waxa hantida aan ahayn ee dembiga culus.
- Soo jeedinta weecinta dhegaysiga maxkamadda ka horreeya.
- Isbaddal ku dhaca jadwalka dhegaysiga haddii uu jiro wacitaan maxkamdeed ama lagu weydiiyo in aad ka maragfurto.
- Xaqa aad u leedahay in aad codsatid qaan-celinyo lagaaga soo qaado marka dembiilaha la maxkamadeeyo.
- Macluumaadka ku jira heshiiska dacwadda lagu dhammeynayo.
- Natiijada kiiska.
- Xukunka kaddib iyo marka la codsado, siidaynta ama ka baxsashada xabsiga ee dembiilaha ama u gudbinta xabsiga ammaanka yar.

QEEXITAANKA DHIBBANAHA DEMBIGA

Siduu qorayo sharciga Minnesota, dhibbanaha dembiga waxaa lagu qeexayaa qof ay soo gaartay dhib ama dhaawac sababo la xariira fal dambi. Dhibaanaha waxaa ka mid noqon karah xubin qoyska, ilaaliyaha, masuulka qof da'yar, qof aan masuuliiyad qaadi karin, qof naafa ah, ama qof dhintay.

Qodobbada Minnesota qaybta 611A, qayb-hoosaadka 1
(Minnesota Statutes section 611A, subdivision 1)

- Racfaanka iyo xaqa loo leeyahay in laga qaybqaato dhegaysiyada la xariira iyo laguu soo soo sheego naatijada racfaankaa.
- Kisaaska dembiyada culus ama gaboodfalka, wixii loo soo jeediyay wax ka baddalidda xukunka, dhegaysiga xiga, iyo xaqa loo leeyahay in laga hadlo.
- Codsiga ka saaridda rikoorka dembiga, marka la codsado.

Xaq ayaad u leedahay in aad ka qaybqaadatid hawlaha dacwadda:

- Ka hadashid maxkmad bilowga go'aanka weecinta dembiga.
- Weydiisato xeer-ilaaliyaha inuu dacwadda soo dedejiyo.
- Laguu soo sheego dhegaysiyada dembi qirasho xukunka lagu dhimayo iyo xukunka.
- Diiddo dembi qirasho xukunka lagu dhimayo ee la soo jeediyay.
- Marka lagu guda jiro baaritaanka xukunka ka horreeya (PSI), aad bixiso macluumaad la xariira sida uu dembiga kuu saameeyay iyo waxa aad ka qabto xukunka la qaadayo.
- Bixisid hadalka saamaynta dhibbanaha marka la qaadayo dhagaysiga xukunka qoraal ama hadal ahaan.

Xuquuqda qaarkeed waxay ku lugleeyihin amaankaaga, keli-ahaanshahaaga, iyo dhowristaada, ay ku jiraan xaqa aad u leedahay:

- In lagula socodsiyo iyo lagu siiyo waxa aad ka qabto dhegaysiga lacag damaanad ah marka ay jiraan xaalado gaboodfal iyo bahdilka.
- Meel ammaan ah ama wax kaa dhawra dembiilaha ama tageerayaashiisa inta maxkamadda lagu jiro.
- Warbixitna handadaadda marqaatiyada ama jabinta amarrada sharciga ah in ammaan lagu siiyo ama faraha lagaa qaado.
- Weydiiso in cinwaannada gurigaaga iyo shaqada, lambarrada telefoonnada, iyo taariikhda dhalashada in laga xannibo dembiilaha iyo madaasha maxkamadda.
- In laga badbaadiyo adiga iyo qoyskaaga argoosiga ka imaanaya shaqaaleeyaha marka aad qaadanaysid shaqo joojis muddo caqligalka ah sii aad uga qaybqaadatid dhegaysiyada ama uga maragfutid gaboodfalka.
- Samaysashada codsi aan shaaca laga qaadayn kaaso maxkmaddu ay ku amrayso in baaritaanka HIV laga qaado eedaysanaha la xukumay marka ay jiraan xaalado kufsasho iyo gaboodfallo ah.
- Marka ay jiraan xaalado dil, in la bixiyo amar maxkamadeed ee ka hortagaya in uu dembiilaha iibiyo hantida dhibbanaha. Sharcigu waa in uu kahortago in uu dembiilaha dembiga maal ka sameeyo.

Si wax looga qabto saamaynta dhaqaale ee dembiga uu sababay, xaq ayaad u leedahay in aad:

- Dalbtid magdhaw (magdhaw dhaqaale) ee aan ahayn khasaaraha hantiyeed ee dembiga la xariira.
- Dembiilaha ka raadsatid qaan-celinyo ee kharashyada kaaga baxay falal si toosa ula xariira dembiga haddii dembiilaha la xukumo.
- Weydiisatid dembiilaha sarkaalkiisa asluubta in uu kuu qabto dhegaysi haddii dembiilaha bixinwaayo qaan-celinyada.
- Khasaarahaaga aad dacwad madani ka xarasysato dembiilaha khasaarahaaga, haddii dacwad dembi ah laga xareeyay iyo haddii kaleba.

BAHDILKA, XADGUDUBKA GALMADA, IYO GAATIMIDDA DHIBBANAYASHA

Xaq ayaad u leedahay in aad:

- Warbixin ka heshid xeerilaaliyaha waxa ku saabsan go'aan kasta ee laga gaarayo ka rebitaanka ama ka saariidda kiiska marka ay jiraan macluumaad ku saabsan amarka maxkamadeed
- Ka baxdo heshiis kiro oo aan ganaax lahayn si ad uga badbaadid xaalad bahdilka.
- Lacagla'aan ka qaadatid koobiga warbixinta shilka hay'adda ammanka ee u xilsaaran ee lagaa rabo in aad qorto haddii aad tahay dhibbanaha bahdilka.
- Lacagla'aan ku qaadatid baaritaanka cafimaadka qarsoodiga marka uu dhaco xadgudubka galmada iyo rugta caafimaadka ay ku lagu siiso ogaysiiska xuquuqda iyo ilaha haddii aad tahay dhibbanaha xadgudubka galmada.
- Diidid baaritaanka wareysiga mashiinka xaqiiqada baaraya ayadoon aysan la socon saamaynta ah in uu jiri doono baaritaan ama sharcimarinta la fulinayo haddi aad tahay dhibbanaha xadgudubka galmada.

OGAYSIISKA XUQUUQDA OO LA SIINAYO DHIBBANAAYASHA

Wakaaladaha ammaanka waxaa lag rabaa inay ogyasiiyan dhibbanayaasha dembiga xuquuqda qaarkood oo ay dhibbanayaasha leeyihiin iyo ilaha deegaanka marka ugu horreeysa ee lala soo xariirayo. Xeerilaaliyaha waxaa laga rabaa inuu siiyo dhibbanayaasha ogaysiiska xuquuqda marka dacwad la xareeyay.

Qodobbada Minnesota qaybta 611A, qayb-hoosaadka 2
(Minnesota Statutes section 611A, subdivision 2)

Su'aalaha inta Badan La Isweydiiyo

Sideen macluumaad qaasa ee kiiska ku xiran ku heli karaa?
Soo wac wakaaladdaada amniga, xeerilaayaha xafiiskiisa, ama bixiyaha adeegyada macluumaadka siiya dhibbanaha.

Maxaa dhacaya haddii aan u baahdo gargaar dhaqaale?
Waxa aad xaq u yeelan doontaa qaan-celinyo ka imaanaysa Gobolka Minnesota haddii aad tahay dhibaane gaboodfaleed iyo aad gashay kharashka daryeelka caafimaadka, la talinta, duugta, mushaar la waayay, amaa xaalado kharashyo kale leh. Waxa aad kaloo xaq u yeelan kartaa qaan-celinyo ka imaanaysa eedeysanaha haddii asaga/ayada lagu helo dembiga ama uu/ay dembiga qirto/qirato.

Ma ka qaybgali karaa dhegaysiyada?
Haa. Guud ahaan, dacwadaha maxkamadda dembiyada ee la xariira eedaysanayaal qaangaar ah dadwaynaha ayay u furanyihiin. Waxaa jira xaalado qaarkood oo uu garsooraha xayiri karo socodsiinta maxkamadda ama shaqsi laga saaro. Dhibbanayaasha marka ay jirto xaalad uu edeenaysaha yahay qof da'yar waa ay ka qeybgeli karaan dacwadda maxkamadda.

Maxaa la iga rabaa inaan sameeyo marka aan helo wacitaanka maxkamadda?
Wacitaanka maxkamadda waa amar maxkamadeed ee lagaa rabo in aad hortimaado maxkamadda. Si fiican u aqriso. Waxaa ku jira macluumaad ku saabsan cidda lagaa rabo in aad wacdo si aad ku heshid macluumaadka maxkamadda iyo rugta maxkamadda. Haddii uu jiro qilaaf jadwal ama su'aalo kasta, wac cidda kuu soo dirtay wacitaanka maxkamadda sida ugu dhaqsiyo badan. Marqaati ahaan, waxaa lagu siin doonaa xoogaa lacaga ee ah waqtigaaga iyo gaadiidka.

Xuquuqda dhibbanaha ma sii jirayaan haddii dembiilaha u yahay qof da'yar?
Haa, isla xuquuqda waa sii jirayaan marka kiisaska ay yihiin kuwo qof weyn ama qof da'yar.

Sideen ku ogaan karaa xilliga dembiilaha xarigga ama xabsiga laga siidaynayo?
Xukunka kahor, xabsiga ama rugta xarigga waa in lala socodsiyaa dhibbanaha gaboodfalka dembiilaha siidayntiisa. Dhibbanayaasha oo idil, dembi kasta ee laga galay, waxaa lagu dhiirigalinayaa in ay iska diiwangeliyaan barnaamijka VINE (Macluumaadka Dhibbanaha iyo La Socodsiinta Maalin Kasta) si ay ku codsadaan siidaytna quumatiga ah. Kaddib marka dembiga lagu helo, dhibbanayaasha maxaabiista ku jira xabsiga waa in ay sameyaan codsi ah ogaysiiska siidaynta ee rugtaas iyo sidoo kale waxa ay iska diiwangelin karaan VINE. Dhibbanayaasha maxaabiista rugta Waaxda Asluubta (Department of Correction) waa in ay iska diiwaangeliiyaan barnaamijka Minnesota Choice si lagu siidaayo ogaysiiska.

Ilaha

Xilliga dembiiluhu uu xiranyahay:
Si lagu codsado ogaaysiinta xaabsiile siidayntiisa ama laguhelo macluumaadka kale ee xabsiyaynta:

Xabsiyada Degmada iyo rugaha xarigga:

Minnesota VINE
Victim Information and Notification Everyday
(Macluumaadka Dhibbanaha iyo
La Socodsiimaha Maalin Kasta)
1-877-MN4-VINE • 1-877-664-8463
www.vinelink.com

Minnesota Department of Corrections (DOC):

Minnesota CHOICE
www.minnesotachoice.com
DOC Victim Assistance Program 800-657-3830

Haddii aad tahay dhibbane dembi ama marqaati rumaysan in xuquuqdiisa la dafiray, wac:

Crime Victims Reparations Board
651-201-7300 • 1-888-622-8799
ojp.dps.mn.gov

Haddii aad tahay dhibbane dembi ama markhaati rumaysan in xuquuqdiisa la dafiray, wac:

Crime Victim Justice Unit
651-201-7310 • 1-800-247-0390 ext. 3

Nagala Soo Xariir

Xafiiska Barnaamijyada Garsoorka
(Office of Justice Programs)
445 Minnesota Street, Suite 2300
St. Paul, MN 55101-1515

Iimeylka: dps.justiceprograms@state.mn.us
Shabakadda Internetka: ojp.dps.mn.gov

651-201-7300 Telefoonka Guud
888-622-8799 Telefoonka Lacagla'aanta
651-205-4827 TTY (Maaqalka Dadka Dhegaha Culus)
651-296-5787 Fakis

1-15

XUQUUQDA DHIBBANAHA DEMBIGA

Xafiiska Barnaamijyada Garsoorka

WAAXDA AMMAANKA GUUD EE MINNESOTA